

Isku diyaarinta dugsiga

Waxaad ilmahaada u diyaarin kartaa dugsiga adigoo:

- La ciyaaraayo ciyaaro u baahan tooko qaadasho iyo wax isla qaybsi
- Ku caawinaayo weydiinta waxa ay u baahan yihiin, haddii aay gaajonayaan, haraadsan yihiin ama daalan yihiin.
- Barashada sida ay u labisan karaan, cunto samaysan karaan iyo musqusha keligooda u isticmaali karaan.

Bilowga dugsiga wuxuu qof walba u ahaan karaa waayo-aragnimo togan

- Waalid ahaan, waxaad tahay macallinka koowaad ee ilmahaada.
- Ogow wax ku saabsan dugsiga si aad u fahanto wixii dhici doono markuu ilmahaada bilaabo.
- Oggolow in macallinka guriga kugu soo booqdo haddii uu dugsiga kani sameeyo.
- Eeg boogga internteka dugsiga.

Hubi inaad og tahay wixii aad samayn kartid maalinta koowaad: meesha la tegi karo subaxa, iyo meesha aad ka soo qaadi kartid ilmahaada.




Miyaad ogeed in markii ay carruurta u bartaan dugsigooda cusub ama dugsigooda xanaanada ay si ka dhaqsi badan ula qabsan doonaan?

Aqri buugaag ku saabsan bilowga dugsiga

Waxaa jiro bugaago badan aad la aqrin kartid ee ku saabsan dugsiga. Kani wuxuu ilmahaada ku caawin karaa inay diyaar u ahaadaan bilowga dugsiga ama u laabashada dugsiga.

Dhowr ka mid ah buugaagta waxay ku xusan yihiin hoos:

- *Starting School (Bilowga dugsiga)* soo saarey Janet and Allen Ahlberg
- *Topsy iyo Tim waxay Bilaabayaana Dugsiga (Topsy and Tim Start School)* soo saarey Jean and Gareth Adamson
- *Tegidda Dugsiga (Going to School)* soo saarey Anna Civardi and Stephen Cartwright
- *Harry iyo Xayawaan Qiroweynka Waxay Tegeen dugsiga (Harry and the Dinosaurs Go To School)* soo saarey Ian Whybrow
- *Adigaba Dugsiga imow, Kangaroo Baluug! (Come to School Too, Blue Kangaroo!)* Soo saarey Emma Chichester Clark
- *Anigaba Waan Ugu Yarahay Dugsiga (I Am Too Absolutely Small For School)* soo saarey Lauren Child



Tababarta caadoyin cusub

Tababar caadoyin ka waxqabadka subaxa, ay ku jirto soo kicitaanka iyo dhar xirashada, iyo quraac cunidda 'waqti sax ah' si aad dugsiga u tagto. Hubi in ilmahaada haysto hurdo ku filan iyo diyaar u yahay dugsiga maalinta koowaad.

Talada xiddigta

Markaad dugsiga ka doonto - ilmahaada ku soo dhawey ilko caddayn ee ma ahan telefoonka gacanta!

Fikrada sheekaysiga

Isla aqriya hal ka mid ah buugaagta ku xusan. Ka wada hadala wuxuu ilmahaada ka dareemaayo bilowga dugsiga.